

Waxaan ku jiraa kooxda kor lagu taxay, waa maxay sababta ay tahay in aan sugo?

Tallaalka COVID-19 waxaa la heli doonaa marka loo ansixiyo isticmaalkeeda iyo marka xirmo walba loo soo saaro.

Sidaa darteed ayaa qaadasho walba loogu baahan yahay in ay ilaaliso kuwa halista ugu sareysa ugu jirta. Waa lagu yeeri doonaa isla marka la helo tallaalo ku fillan.

Dadka qaarkiis oo guriga ku xaniban ama ku nool guri daryeel oo aan aadi karin xarun tallaalo oo maxalli ah waxaa suurtagal ah in ay sugaan helitaanka tallaalka saxda ah. Arintani sababteedu waa in tallaalada qaarkood oo keliya la isaga safrin karo guryaha dhexdooda.

Halkee ayaan ka heli karaa tallaalkayga COVID-19?

Tallaalka waxaa la isku siin doonaa meello kala duduwan. Kooxaha tallaalka qaarkood ayaa dadka soo booqan doona si ay tallaalka u siiyaan, tusaale ahaan guryaha daryeelka, dadka kale ayaa laga yaabaa inay tahay in ay aadaan xarumaha ugu dhow. Sababta oo ah in tallaalka qaarkood ay u baahan yihiin in lagu hayo qaboojiye (freezer) heer-kulkiisu aad u hooseeyo, waxaa suurtagal ah in aadan tallaalka ku hellin xaruntaada caadiga ah ee GP-gaaga.

Maxaa dhacaya haddii xarunta la ii yaboohay ay tahay mid aan si sahal ah lagu tagi karrin?

Fadllan isku day in aad tagto xarunta tallaalka lagu yaboohay. Haddii aadan xaruntaas tagi karin waxaa suurtagal ah in aad sugtid si aad tallaalka ugu heshid meel ka sii munaasab ah.

Tallaalka COVID-19 miyaan uga heli karaa anigoo lacag la baxaya si gaar ah ama farmasiga?

Maya, tallaalka COVID-19 waxaa keliya oo laga heli karaa NHS waxaana heli kara kooxaha xaqa u leh waana tallaalo lacag la'aan ah.

Fadllan ka akhri macluumaadka badeecadda waraaqaha ku qoran wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, oo ay ku jiraan waxyeelooyinka ka iman kara, adigoo ka baaraya Mashruuca Kaarka Jaallaha ah.

Waxaad sidoo kale ku sheegi kartaa dhibaatooyinka laga shakiyey ee ka yimaada tallaalka isla bogga internet-ka ama adigoo soo dejisanaya Mashruuca Kaarka Jaallaha ah.




coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk

Tallaalka, wuxuu caawinayaa ilaalinta kuwa ugu nugul.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka COVID-19 booqo www.nhs.uk/covidvaccination

© Xuquuqda daabacaada Crown 2020.
COV2020308V2SO 5M 1p JAN (APS) 2021
Public Health England gateway number: 2020578

Waxaad ka dalban kartaa waraaqahan lacag la'aanta ah oo dheeraad ah www.healthpublications.gov.uk



Macluumaad ku saabsan kaydka bixinta tallaalka COVID-19



Tallaalka COVID-19

Ilaali naftaada


Dadka halista sare ugu jira dhibaatooyinka COVID-19 ayaa marka hore la siinayaa tallaalka.

UK, waxaa jira laba nooc oo tallaalka COVID-19 ah oo la ansixiyey. Waxaa ay labadooduba u baahanayaan in laba jeer la qaato si ay kuu siiyaan ilaallin waqti dheer sii jirta. Labadaba waxaa lagu cadeeyey tijaabooyin caafimaad waxaana ay leeyihiin diiwaan badbaado-qab wanaagsan.

Koox khubaro ah oo madax bannaan, ayaa ku taliyey in NHS-ta ay tallaalka marka ugu horeysa siiso kuwa halista ugu sareysa ugu sugan in ay cudurka qaadaan iyo in ay ku dhacdo jirrooyinka darran ama dhintaan haddii uu caabuqa COVID-19 ku dhaco. Kuwan waxaa ku jira dadka waayeelka ah ee deggan guryaha daryeelka iyo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada.

Marka la hello tallaal dheeraad ah, tallaalka waxaa la siin doonaa dadka kale ee halista ku jira sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

Waa in aad qaadataa tallaalka marka lagu soo bandhigo haddii aad:



Ka dib tallaalka waxaa kaloo loo bixinayaa da' ahaan sida la isugu xigxigo:

- kuwa ka weyn 80 jir
- kuwa ka weyn 75 jir
- kuwa ka weyn 70 jir
- qaangaar liiska bukaanka la ilaalinayo
- kuwa ka weyn 65 jir
- qaangaarka ka yar 65 jir oo leh xaalado caafimaad oo sii daba-dheeraada (eeg liiska).

Kuwa jira inta u dhexeysa 50-64 ayaa mar dambe la siin doonaa.

Fadllan sug doorkaaga. Haddii aadan ku jirin kooxda kor ku xusan, waa in aad sugtaa tallaalka COVID-19 ilaa kayd tallaal bixin oo dheeraad ah laga helayo.

Marka tallaalo dheeraad ah la helo waxaan siin doonaa kooxo dheeraad ah oo dadka ka tirsan.

Liiska xaaladaha caafimaad:

- kansar dhiiga ah (sida leukaemia, lymphoma or myeloma)
- kaadi macaan
- Dementia (xusuus guurka)
- dhibaato wadnaha ah
- cabashada xabadka ama dhibaatooyinka neefsashada, oo ay ku jiraan boronkiitada, neef-qabashada ama cudurka neefta ee aadka ah
- cudurka kalyaha
- cudurka beerka
- difaaca jirka oo hoos u dhacday sababo la xiriiira cudur ama daaweyn awgeed (sida caabuqa HIV, daaweynta steroid, chemotherapy ama radiotherapy)
- cudurada rheumatoid arthritis (xanuunka kala-
- goysyada), lupus ama psoriasis
- in xubin jirka ah lagaa bedeley
- kugu dhacay istaroor ama maskaxda oo dhiigga ku yeraada (transient ischemic (TIA)
- cudurada baabi'ya xididdada ama murqaha
- dhibaato aad ah ama saameyn weyn leh oo cillad xagga waxbarashada ah
- dhibaato kaa haysata beeryarada, sida cudurka ku dhaca dhiig casaha (sickle cell), ama lagaa saarey beeryarada
- culeyskaagu uu xad dhaaf yahay (BMI oo 40 ah iyo wixii ka sareeya)
- aad qabtid cudur aad u darran oo maskaxda ah

Isla waqtigaas tallaalka waxaa kaloo la siinayaa:

- qaangaarka si joogta ah u siiya daryeel qof weyn ama qof naafo ah
- dadka qaangaarka ah ee aan waayeelka ahayn ee ku jira xannaaneynta iyo degenaanshaha muddada dheer